



Xukuumaddu waxay go'aansatay inay ka dhigto qaadka mid sharci-darro ah ee daroogada heerka Kalaaska C. Mamnuucidda qaadka wuxuu dhaqangalayaa maalinta 24ka Juun.

Sababtee ayaa qaadka loo mamnuucay?

Qaadka waxaa ku jira nooc sheeyo horeba u ahaa daroogooyin laga ilaaliyo labadaba UK iyo caalamkaba sababtoo ah waxyeello ayay gaystaan. Si looga caawiyo bulshada degaanka arrimaha dhibaatooyinka caafimaad iyo bulsho ee uu wato qaadku iyo si loo xaqiijiyo in waddanka UK uusan u noqon meel dhexe ee la kala qaato caalam ahaan qaadka. Waxay noqon doontaa sharci-darro in la soo saaro, la haysto la keeno iyo la soo dejiyo ama la dhoofiyo qaadka iyadoo aan warqad oggolaansho laga haysan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Maxaa dhacaya haddii aad isticmaasho qaad laga bilaabo 24ka Juun ee gudaha England iyo Wales?

Laga bilaabo 24ka Juun 2014, booliisku waxay isticmaali karaan digniino qaad iyo ganaaxyo ogaysiin ee amar-diido (penalty notices for disorder (PND)) ee £60 dadka waawayn. Tani macnaheedu waa in haddii booliisku kugu helo qaad loogu talagalay isticmaalkaaga, waxaa:

- lagu siin karaa digniin fal-dambiyeed haysashada ugu horaysa
- lagu siin karaa ganaax ogaysiin amar-diido (ganxaax ah £60) ee fal-dambiyeed haysashada labaad
- la kulmi kartaa xarig ee fal-dambiyeed haysashada saddexaad.

Ma qusayn doonaa joojinta qaadka labadaba goobaha dadwaynaha iyo kuwa gaar ahaaneedba?

Haa. Qaadka wuxuu noqon doonaa daroogo sharci-darro ah ee nooca Kalaaska C iyadoo tani waxay qusaysaa guud ahaan UK.





Maxaa ku dhacaya kuwa ka yar 17 sano jir ee lagu qabto qaadka?

Dadka dhallinyarada ah ee da'doodu tahay 17 sano jir, ama ka yar, lama siin karo Digniinta Qaadka ama PND ee haysashada qaadka. Qaybta 65 ee Xeerka Dambiyada iyo Amar-diidada 1998 (Crime and Disorder Act 1998) wuxuu u baahan yahay in dadkaas dhallinyarada ah loo tixgeliyo wargelin dhallinyaro, wargelin dhallinyaro shardiyaysan ama ciqaab maxkamadeed.

Maxaa dhacaya haddii aad ka ganacsato qaadka markii uu noqdo daroogo sharci-darro ah ee nooca Kalaas C?

Haddii lagugu qabto, booliisku tallaabo ayuu qaadayaa waxaana jiraya khatar ah ciqaab maxkamadayn. Daroogo nooca Kalaas C ahaan waa sharci-darro in la keeno, la haysto iyadoo la ogayahay keenidda iyo soo dejinta qaadka. Ciqaabaha fal-dambiyeedyada daroogada Kalaas C waxay gaaraysaa 14 sano xabsi ah, ganaax aan xad lahayn ama labadaba.

U keenidda qaad saaxiibadaa, xitaa haddii aad iska siiso, waxaa loo tixgelinayaa 'keenitaan' sharci ahaan.

Xaggee ayaan ka heli karaa talo-bixin iyo caawinaad ku saabsan iska dhaafidda qaadka?

Wixii talo-bixin iyo macluumaad ku saabsan adeegyada caawinta degaanka iyo daawaynta isticmaalka qaadka, dhakhtarkaaga (GP) ama dawladda hoose ee degaanka waa goob fiican in laga bilaabo. Talo-bixin xog-xajisan iyo macluumaad ku saabsan adeegyada caawinta degaanka iyo daawaynta fadlan booqo <http://www.talktofrank.com/need-support> ama <http://www.nta.nhs.uk/who-service.aspx>